



## Caawimaad ka geyso qurxinta dugsiyada xaafaddaada

Galab wanaagsan qoysaska iyo shaqaalaha PPS,

Waxaan rajeynaya inaad ku jirtaan waqtiga xagaaga oo wanaagsan, waxaan rajeynaya inaad tixgelin siin doontaan ku tabarucida wax yar oo ka mid ah waqtigiina iyo tamartiina si aad dugsiyadeena uga caawisaan in ay noqdaan kuwo muuqaal wanaagsan u leh ardayda maalinta ugu horeysa ee dugsiga.

Mashruuca Maalinta Xannaanada Bulshada waa mid dhaqan ahaan sanadle ah iyo fursad wanaagsan oo gacan lagaga geysto quruxda dhulka dugsigeena. Sanadkani waxaa la qaban doonaa Sabtida, Ogoosto 24, laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa duhurka.

Fadlan booqo [pps.net/volunteer](http://pps.net/volunteer) wixii macluumaad dheeraad ah, iyo liiska dugsiyada ka qaybqaadanaya, markaasi ka dibna soo qaata gacmo gashigiina iyo qalabkiina beeraha. Waxaan idiin soo jeedinaynaa sidoo kale inaad soo qaadataan biyo iyo cunto fudud.

Waxaan rajeynaya inaan kuwo badan oo idinka mid ah ku arko dugsiyada PPS marka la gaaro Ogoosto 24.

Inaga oo wadajirna, waxaan kobcin karnaa bulshada dugsiyadeena.

Si Daacadnimo leh,

Guadalupe Guerrero  
Kormeeraha guud